# Koodhka furaha *(avainkoodi)* ah ee Wilma-da sida looga dhigo aqoonsi waalidku ku galaan Wilma-da
(13.8.2013)

Koodh kasta oo fure ah hal mar kaliya ayaa la isticmaali karaa. Halkii fure koodh waxaa laga samayn karaa hal aqoonsi oo hal waalid loogu talogalay inuu Wilma-da ku galo

1. Waxaad internetkaaga ku qortaa ciwaankan https://wilma.edu.vantaa.fi/connect

2. geli e-maylkaaga halka banaan ee ay ”sähköpostiosoite” (aqoosiga isticmaalaha waxaa kuu noqon doona e-maylkaaga )
   Ka dib riix botonka ay ku qoran tahay ”Lähetä varmistusviesti” *oo macnaheedu yahay ii soo dir fariin hubin ah*




3. Wilma markaas ka dib waxay kuu soo diraysaa e-mayl hubin ah, marka hadda iska xir bogga Wilma-da oo furo e-maylkaaga

4. E-maylkaaga waxaa ku jira e-mayl Wilma-du kuu soo dirtay oo ay la socoto linki ama ciwaan aad riixayso oo Wilma-dii kugu geynayso halkii aad aqoonsigii aad ku geli lahayd Wilma-da ka samaysan lahayd

5. Hadii aad samaynayso aqoonsi isticmaalle oo aad horay u lahayd, macnaha aqoonsi iticmaalle oo aad hadda ka hor samaysatay, geli aqoonsigaagii hotreeto meesha cad ee banaan ee bidixda ku taala ka dibna riix botonka ay ku qoran tahay ”Lisää rooli”




Hadii aad ka samaynayso koodhka furaha ah aqoonsi cusub, geli oo ku qor koodhka furaha dhinaca midigtaa ee banaan halka falaartu tilmaamayso, ka dibna riix botonka ay ku qoran tahay ”Lisää avainkoodi”

Hadii aad doonayso inaad caruur badan oo aad dhashay oo kuli Vantaa iskool ka wada dhigta hal meel isugu geeyso oo hal aqoonsi u wada samaysato, hadda ku wada qor dhammaan koodhadhka furaha ah ee lagu siiyey halkan loogu talogalay in koodhadhka furaha la geliyo (mar kasta oo aad h fure ah geliso waa inaad riixdo botonka ay ku qoran tahay ”Lisää avainkoodi”)




Mar alle iyo markaad wada gelisay kuli aqoonsiyadii ama koodhadhkii furaha ahaa, si aad horay ugu socoto riix botonka ay ku qoran tahay ”Jatka”.

6. Borogaraamku wuxuu ku weydiinayaa hadda lambarka aqoonsiga da’da dhalshada ee ilmaha.
   Lambarka aqoonsiga waxaa loogu qoraa sida uu kaarka Kela-da ugu qoran yahay.



7. Meelahan banaan ku qor magacyadaada (ha ku qorin magaca ilmaha ee kaaga ku qo-ro)




8. Meelahan banaan ku qor kalimaddaada sirta ah *(kalimadda sirta ah waa in ay noqoto xuruuf iyo lambaro waana in ugu yaraan xaraf far waa weyn ahi ku jiraa).* Ugu qor laba jeer si isku mid ah kalimadda sirta ah. Xasuusana oo ha ilaaawin kalimaddaada sirta ah.



9. Hubi waxaad qortay ka dibna riix botonka ay ku qoran tahay ”Yhdistä”






Haddii waalidku ay leeyihiin ama horay u haysteen aqoonsi u gaara oo ay Wilma-da ku galaan oo kaliya markaas rabaan inay ilmo kale oo ay dhaleen ku siyaadiyaan

Waxaad markaas yeeli sidan; si caadi ah marka hore Wilma-da u gal oo ku gal aqoonsigaaga kuu gaarka ah, ka dib boggan dhinaciisa midig halka falaartu tilmaamayso riix halka ay ku qoran tahay ”käyttöoikeudet”




Waxaad markaas tagi bog aad ka helayso marin ay ku qoran tahay ”Lisää rooli”



Bogga waxaa geli kartaa markaad geliso koodhkii furaha ahaa ee lagu siiyey ama hadii ilmahaaga awal laguugu sameeyey waxa loo yaqaan aqoonsigii hore ee awal horey u jiri jiray (vanhamuotoinen tunnus), ku qor kaas booska Wilma-da loogu talogalay in aqoonsiga lagu galo lagu qoro. Say doontaba ha ahaatee labada habba kaa doorataba aakhirka riix botonka ay ku qoran tahay ”Lisää”.




Markaa wada geliso dhammaan koodhedhkii furaha ahaa ama aoonsiyadii Wilma-da riix botonka ay ku qoran tahay ”Jatka” ka dib halkaas ka sii dabagal siduu borogaraamku kuu hago.